


Dhis xiriir adag oo jiraya nolosha dhan

ABC Föräldrträffar

Da'da qaangaarka

Nolosha carruurta waa farxad miiran, balse wadata culayskeeda. Ku soo dhowow **ABC kulammada waalidiinta da'da qaangaarka** halkaasoo aad ka helaysid qalab iyo talooyin la taaban karo oo fududaynaya nololmaalmeedka, xoojinayana waxbarashda iyo horumarka ilmahaaga. Kulammada waxaan isku arkaynaa si koox ah si aad ula sheekaysatid waalidiin kale, isweydaarsataan khibrado oo aad heshid aragtiyo cusub.



ABC föräldrträffar
goteborg.se/abc



Göteborgs
Stad

Salaan waalid!

Da'da qaangaarku waa waqti wax badan isbeddelayaan. Ilmahaaga tallaabooyin muhiim ah ayay u qaadaayaan dhanka da'da weyn. Ka waalid ahaan waxaad dareemi kartaa loollan, balse waxaad kaloo fursad u haysataa in aad xiriirka mustaqbalka xoojiso.

Wadahal iyo tababarro ayaad ku baranaysaa inaad xoogga saartid waxa ka shaqaynaya xiriirka ilmahaaga. ABC kulammada waalidiinta da'da qaangaarka waxaan is arkeennaa afar jeer oo aan ka shaqaynaynaa mowduucyadan:

- » In la wadajiro
- » Wadahadal fiican
- » Dooro waddo deggan
- » Maareey dhibka

Kulammada ka dib kulammo dheeri ah ayaa baxaya oo ku saabsan waxbarashada iyo jacaylka da'da qaangaarka.



Iskaan ka qaad koodka QR si aad uga heshid kulan waalid meel kuu dhow. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan taageerada waalidiinta waxaad ka helaysaa:
goteborg.se/foraldrastod

Carruurtoo idil oo bartamaha ah (ABC) waa barnaamij taageero waalid ah hadafkiisuna yahay in la xoojiyo xiriirka ka dhexeeya ilmaha iyo waalidiinta oo kulamo kooxeedyo xoogga lagu saarayo islafalgalka, xiriirirka iyo rootiinnada maalinlaha ah la qabto. Waa Kulammo bilaash ah loogu talagalay waalidiinta heysta carruurto jira 0-2 sanno, 3-12 sanno iyo da'da qaangaarka.

"Waa ii fududdahay inaan diiradda saaro waxa shaqaynaya, waa xusuusin fiican"

Sidan ayay yiraahdeen waalidiin soo dhigtay ABC

"Waxay iga caawisay waxaan mudnaanta siinayo si ilmahayga u dareemo in la arkayo oo la dareemayo."